



# Barnaamijyada Kaydka ee Medicare Lacag ku Dhaqaaleyso Medicare

In ka badan \$2,100 sannad kasta

*Dib u geli lacagta jeegaada Dammaanada Bulshada!*

## Ku saabsan Barnaamijka Kaydka ee Medicare

Waxaa jira afar barnaamijyo oo ka jira Gobolka Washington:

### Barnaamijka 1

#### Barnaamijka Kafaa'ideystaha U qalma Medicare (QMB)

- Bixiya lacagaha joogtada ah ee caymiska Qaybta A iyo Qaybta B
- Bixiya lacagaha laga jari karo
- Bixiya lacagaha-la-wadaago ee aan ka ahayn kuwa loogu talo galay daawooyinka dhakhtarku qoro

### Barnaamijka 2

#### Kafaa'ideystaha Medicare ee Dakhliga- hooseeya ee La Xaddidey (SLMB)

- Bixiya lacagaha joogtada ah ee Caymiska Qaybta B

### Barnaamijka 3

#### Barnaamijka Shakhsiga U-qalma (QI-1)

- Bixiya lacagaha joogtada ah ee Caymiska Qaybta B

### Barnaamijka 4

#### Shakhsiga Shaqeeya Naafada ah ee U-qalma (QDWI)

- Bixiya lacagaha joogtada ah ee caymiska ee Qaybta A

## Ogow Haddii Aad U-qalanto

Isticmaal xaashidan lagu shaqeeyo ee shakhsiyeed

Raac tallaabooyinkan fudud ee hoos ku xusan ka-dibna isbarbardhig wadarada guud ee shaxda hoose si aad u oggaato haddii aad u-qalanto Barnaamijka Kaydka ee Medicare (Medicare Savings Program).

1. Hoos ku qor dakhliga **guud** ee bilaha ah ee qoyska \$ \_\_\_\_\_
2. Kajar \$20 (hal jaris qoys kasta) \$ \_\_\_\_\_
3. **Dakhliga Guud** \$ \_\_\_\_\_
4. Haddii dakhligaaga bilaha ah uu yahay ama ka yar yahay mid kasta oo ka mid ah heerarka shaxda kor ku xusan, waxaad xaq u yeellan kartaa mid ka mid ah Barnaamijyada Kaydka ee Medicare.

## Jaangooyooyinka Dakhliga Barnaamijyada Kaydka ee Medicare

Nooca Barnaamijka Medicare	Dakhliga Billaha ah (Shakhsiga)	Dakhliga Billaha ah (Lammane)
Barnaamijka 1 QMB	Illaa \$1,381	Illaa \$1,874
Barnaamijka 2 SLMB	Illaa \$1,506	Illaa \$2,044
Barnaamijka 3 QI-1	Illaa \$1,732	Illaa \$2,351
Barnaamijka 4 QDWI	Illaa \$2,510	Illaa \$3,407

Dhaqangal ah 4/1/2024

\*Barnaamijka QDWI ee loogu talagalay dadka naafada ah ee shaqeeya wuxuu leeyahay lacag laga jaro dakhliga kasbashada gaarka ah sidaa daraadeed waxaad u baahan doontaa in aad weyddiisato caawimaad go'aaminta xaq-u-yeelashada barnaamijkan.

## Sideen u Codsadaa?

Way fududahay! La xiriir Xafiiska Adeegyada Bulshada (CSO) ee degaankaaga.

- Ka raadi xafiiska CSO ee kuu dhow:  
**[dshs.wa.gov/office-locations](https://dshs.wa.gov/office-locations)**  
**AMA**
- Barta Internet, ka booqo mareegtadan:  
**[washingtonconnection.org/home/](https://washingtonconnection.org/home/)**  
**AMA**
- Waxaad ka waci kartaa Maamulka Daryeelka Caafimaadka 1-800-562-3022, lambarka dheeraadka ah 16129 si codsiga boostada laguugu soo diro.

## Haddii aad tahay kafa'ideystaha medicare

Waxaad xaq u yeellan kartaa barnaamij kuu dhaqaaleyn kara in ka badan \$2,100 sannadkii. Barnaamijka Kaydka Medicare wuxuu caawiyaa dadka u qalma isaga oo bixinaya lacagta joogtada ah ee caymiska Medicare, lacagaha laga jari karo iyo kharashaadka kale ee laxiriira-Medicare. Waxaad yeellan kartaa Medicare caadiga ah ama qorshaha daryeelka Medicare ee la maareeyo. Codsashadu waa mid fudud.

Wac maanta haddii aad u baahantahay macluumaad iyo caawimaad — waxaa laga yaabaa in aad lacag dib u gelieyso jeebkaaga!

## Waa maxay noocyada kharashaadka la caymiyo?

Barnaamijka Kaydka Medicare wuxuu caymin karaa kuwan soo socda:

- Lacagaha joogtada ah ee caymiska Qaybta A
- Lacagaha joogtada ah ee caymiska Qaybta B
- Caymiska-la-wadaago ee Medicare
- Lacagaha laga jari karo ee Medicare

## Sideen ku Oggaan karaa haddii Aan u qalmo?

Kumanaan dad ah oo ku nool Gobolka Washington ayaa u qalma Barnaamijka Kaydka Medicare. Si aad u oggaato haddii aad xaq u yeellan karto, eeg shaxda dakhliga ee ku qoran waraaqdan daabacan. Haddii dakhligaaga billaha ah uu yahay ama ka hooseeyo mid kasta oo ka mid ah heerarka shaxda kore waxaad xaq u yeellan kartaa mid ka mid ah Barnaamijyada Kaydka Medicare.

## Faa'idooyinkaan ma yihiin kuwo saameynaya hantidayda?

Maya, ma jiro soo celin hanti oo loogu talo galay Barnaamijka Kaydka Medicare.



Haddii aad u baahan tahay in lagaa haqabtiro adeegyada qaar, ama aad u baahan tahay dokumentiyo qaab kale ah ama ku qoran luuqad kale, fadlan wac 1-800-562-3022 (TRS: 711)